daabac | Dib-u-sax foomka

# Foomka Codsiga Baahiyaha Bulsheed ee Caafimaadka La Xiriira (HRSN) ee loogu talagalay: Codsiga Qalabka Cimilada La Xiriira

## Ujeeddo

Qorshaha Oregon Health Plan (OHP) ayaa dabooli kara qalabka/aaladaha si aad badqab u ahaato xilliga cimilada adag iyo marka tayada hawadu liidato, sida:

- Kulka daran,
- Qabowga daran,
- Qiiqa ka dhasha dabka duurka, ama
- Koronto la'aan ka dhalata cimilada.

Isticmaal foomkan si aad u codsato:

- Hawo qaboojiye,
- Hoy-kululeeye la qaadi karo,
- Qalabka hawada sifeeya,
- Qaboojiye yar oo loogu talagalay daawooyinka, iyo
- Keyd-dabeed la qaadi karo oo loogu talagalay qalabka caafimaadka haddii ay korontadu tagto.

Barnaamijka OHP ayaa daboola nooc kasta oo qalab ah ee qoys kasta. Haddii aad u baahan tahay wax ka badan hal qalab/aalad, qorshaha OHP ayaa dabooli kara iyadoo lagu salaynayo duruufahaaga. Haddii hal xubin qoyseed ka badan uu qalabku u baahan yahay, qof kasta foom ayaad u buuxin kartaa.

Qorshaha OHP ayaa daboola/caymiya qalabka loogu talagalay xubnaha:

- Qaba xaalad caafimaad oo ka dhigaysa xilliga cimilada adag iyo marka tayada hawadu liidato mid adag ama khatar ah, iyo
- La kulmay mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:
    - » Halis ugu jira inay hoy ay ku noolaadaan waayaan ama hoy-laawe noqdaan oo aan haysan goob ay ku noolaadan,
    - » Dhawaan helaya caymiska Medicare marka loo geeyo qorshaha OHP,
    - » 12-kii bilood ee la soo dhaafay lagu daryeelay:
        - – Isbitaalka Oregon State Hospital
        - – Barnaamijka daawaynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha ee xarumaha, ama
        - – Barnaamijka maareynta ku tiirsanaanta daawooyinka
    - » 12-kii bilood ee la soo dhaafay laga soo siidaayay:
        - – Jeelka,
        - – Xarunta xabiska, ama
        - – Maamulka Dhallinyarada Oregon,
        - – Xabsiga, ama
    - » Ka hela adeegyada daryeelka ilmaha gudaha Oregon.

## Yaa buuxin kara foomkan?

- Adiga,
- Waalid, daryeele, ama xubin qoyseed,
- Mas'uul, caawiyaha, ama saaxiib lagu kalsoon yahay,
- Shaqaalaha ka socda hay'adda ee adiga ku caawiya.

## Halka loo soo diro foomka la buuxiyay:

- **Xubnaha hay'adda daryeelka isku duwan (CCO):** Dib ugu dir foomkan CCO-gaaga.
- **Haddii aad leedahay Kaarka Furan (Acentra Health):** U dir ORHRSN@kepro.com ama fakis ahaan ugu dir 1-833-551-2607.

## Su'aalo ma qabtaa?

- **Xubnaha CCO:** Weydii CCO-gaaga sida foomkan loo soo gudbiyo.
- **Haddii aadan garanayn CCO-gaaga**, ka wac OHP Client Services lambarka 1-800-273-0557.
- **Haddii aad leedahay Kaarka Furan (Acentra Health)**, fadlan wac 888-834-4304.

## Macluumaadka Acentra Health

- Cinwaanka iimaylka ee HRSN waa: ORHRSN@kepro.com
- Lambarka Telefoonka ee HRSN waa: 888-834-4304
- Fakiska Elektarooniga ee HRSN waa: 833-551-2607

## Qaybta 1: Macluumaadka loo baahan yahay

Fadlan dhammeystir dhammaan macluumaadka ku jira qeybtan.

### Macluumaadka xubinta

Lambarka Aqoonsiga Qorshaha Oregon Health Plan # (*haddii aad garanayso*): ______________________

Taariikhda dhalashada (*BB/MM/SSSS*): ______________________

Magaca (*isla sida uu ugu qoran yahay kaarka Aqoonsiga Caafimaadka ee Oregon*): ______________________

Magaca la doorbidayo: ______________________

Magac-u-yaalada la doorbidayo: ______________________

Luuqadda hadalka ee la doorbidayo: ______________________

Luuqadda qoraalka ee la doorbidayo: ______________________

Haddii aad garanayso, sheeg magaca hay'adda daryeelkaaga isku dubarido (CCO) ama sheeg haddii aad leedahay Kaarka Furan ee Acentra Health: ______________________

Qaabka ugu fiican ee la iila soo xiriiri karo waa: ☐ Telefoonka ☐ Farriimaha Gaagaaban ☐ Iimaylka ☐ Boostada ☐ Fool-ka-fool

Waqtiga ugu fiican ee la ila soo xiriiri karo waa: ☐ Subaxdii ☐ Galabtii ☐ Fiidkii

Waa CAADI inaad inoo dhaafto farriin faahfaahsan oo ku saabsan codsigaaga: ☐ Haa ☐ Maya

Lambarka telefoonka (*haddii aad mid leedahay*): ______________________

Cinwaanka iimaylka (*haddii aad mid leedahay*): ______________________

Cinwaanka boostada (*haddii aad mid leedahay*): ______________________

### Macluumaadka codsiga

Waxaan codsanayaa (*calaamadee kuwa ku khuseeya oo dhan*): ☐ Hawo qaboojiye ☐ Hoy-kululeeye la qaadi karo ☐ Qalabka hawada sifeeya ☐ Qaboojiye yar oo loogu talagalay daawooyinka ☐ Keyd-dabeed la qaadi karo oo loogu talagalay qalabka caafimaadka haddii korontadu ay tagto

Si badqab leh ayaan qalabka ugu isticmaali karaa halka aan ku noolahay. Si badqab leh oo sharci ah ayaan qalabka ku gelin karaa dabka. ☐ Haa ☐ Maya

Urur/hay'ad ama barnaamij kale ayaa mar hore i siiyay qalabka ama aaladaha. ☐ Haa ☐ Maya

## Bayaanka Xaqiiqada

Marka aan saxiixo foomkan, waan fahamsanahay waana oggolahay in:

- Waxaan rabaa Acentra Health ama CCO-gayga inay ogaadaan inaan u-qalmo qalabka si uu ii caawiyo xilliga cimilada adag ama tayada hawo ee xun.
- Acentra Health ama CCO-gayga way ila soo xiriiri karaan si ay u helaan macluumaad dheeraad ah oo aniga igu saabsan.
- Waxaan saxiixay aniga oo og ciqaabta ka dhalan kartra been-abuurka. Inta aan ogahay, macluumaadka aan ku dhex bixiyay codsigan waa mid dhab ah, sax ah, oo dhammeystiran.
- Haddii aan bixiyo macluumaad aan dhab ahayn ganaaxyo ayaa la i saari karaa iyadoo la cuskanayo sharciga gobolka ama ka dawladda dhexe. Tani waxa ku jiri kara dib-u-bixinta lacagaha ku baxay adeeg kasta ee aan ku helay codsigan dartiis.

## Saxiixa

Wakiilka ayaa xubinta OHP u saxiixi kara foomkan, oo ay ku jiraan xubnaha da'doodu ka yar tahay 18 jir.
Waxba haku qorin goobta magaca iyo saxiixa wakiilka haddii aad buuxinayso foomkan adiga laftaada.

Magaca xubinta: ____________________

Saxiixa xubinta: ____________________

Magaca wakiilka: ____________________

Saxiixa wakiilka: ____________________

Taariikhda: ____________________

## Qaybta 2: Macluumaadka ikhtiyaarka ah

Kuma khasbanid inaad imminka ka jawaabto su'aalahan.

- **Haddii aad ka jawaabto:** Waxay kaa caawin doonaan adiga iyo CCO-gaaga ama Acentra Health inaad ogaato inaad qalabka u-qalanto.
- **Haddii aadan ka jawaabin:** CCO-gaaga ama Acentra Health ayaa kula soo xiriiri doonaa si ay su'aalo kuu weydiiyaan goor dambe.

**Duruufaha**
(*Calaamadee haa haddii ugu yaraan mid ka mid ah waxyaabahan soo socda ay adiga ku khuseeyaan, calaamadee maya haddii waxyaabahan midna aysan ku khusayn.*)

☐ Haa ☐ Maya

- Waxaan u-qalmi doonaa caymiska Medicare 3-da bilood ee soo socda.
- Waxaan iska diiwaangeliyay caymiska Medicare markii ugu horreysay muddo 9 bilood kahor aan ka badnayn.
- Hoy-laawe ama guri la'aan ayaan dhawaan noqon karaa.
- Ugu yaraan boqolkiiba 50 dakhligayga in ka mid ah ayaan kiro ku bixiyaa.
- Waxaan ku noolahay gaari madadaalo (RV) ama rimoor.
- Hoy-laawe ayaan ahay.
- Ma haysto goob aan si joogto ah u seexdo.
- Qof kale gurigiisa ayaan ku noolahay.

- Waxaan daryeel ka helay Isbitaalka Gobolka Oregon 12-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Waxaan daryeel ka helay xarunta daaweynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha 12-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Waxaan daryeel ka helay barnaamijka maareynta ka go'ida daawooyinka ee weyn 12-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Xabsi, xarun xabis, xarunta ama xabsiga Maamulka Dhalinyarada Oregon ayaa la iga soo daayay 12-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Waxaan ku lug lahaan jiray adeegyada daryeelka carruurta ee Oregon qayb noloshayda ka mid ah.
- Waxaan ku jiri jiray xarunta xannaanada ama xarunta daryeelka beddelka ah.
- Waxaan helay caawimada korsashada ilmaha ama kaalmada mas'uuliyadeed ama adeegyada ilaalinta qoyska.
- Waxaan maxkamad u koray arrin ku saabsan daryeelka ilmaha.

**Xaaladaha iyo sooyaalka caafimaadka**

(*Calaamadee haa haddii ugu yaraan mid ka mid ah waxyaabahan soo socda ay adiga ku khuseeyaan, calaamadee maya haddii waxyaabahan midna aysan ku khusayn.*)

☐ Haa ☐ Maya

- Qofka aan codsigan u buuxinayo wuxuu ka yar yahay lix (6) sanno jir.
- Waxaan ahay 65 jir ama wixii ka weyn.
- Uur baan leeyahay.
- Waxaan qabaa naafada dareenka, jirka, garaadka, ama korritaanka.
- Waxaan qaataa daawo(daawooyin) u baahan in la qaboojiyo.
- Waxaan isticmaalaa qalab caafimaad oo u baahan in la dabeeyo si uu u shaqeeyo.
- Waxaan adeegsadaa qalab kaaba jirka oo u baahan koronto si uu u shaqeeyo.
- Waxaan qabaa sonkorow waana inaan qaato daawooyin ama insuliin si aan isaga daaweeyo.
- Waxaan qabaa wadno xanuun joogto ah, sida wadna istaag ama wadno-qabad.
- Dhiig-furan maskaxeed/faalig ayaa horay iigu dhacay.
- Waxaan qabaa xaalad daba-dheeraatay oo halis ii galinaysa xinjirowga dhiigga.
- Waxaan qabaa xaaladda sambabada ee daba-dheeraatay sida: cudurka sambabada ee joogtada ah (COPD), boronkiitada raagta, boronkiito, xiddido dhiigeysiga, ama cudur kale oo sambabada ku dhaca oo xanniba.
- Waxaan qabaa neef waana inaan si joogto ah u qaataa daawooyinka si aan u xakameeyo
- Waxaan guriga ku isticmaalaa ogsijiin.
- Waxaan qabaa cudurka kelyaha ee daran.
- Waxaan qabaa cudurka raaga ee ku dhaca nidaamka dhexe neerfaha.
- Waxaan qabaa cudurka Parkinson's.
- Waxaan dhaawac ka qabaa laf-dhabarta.
- Waxaan daryeelka gebagebada nolosha ku helaa gudaha guriga.
- Waxaa igu dhacay xanuun kulayl ama qabow la xiriira waxaana u baahday daryeel degdeg ah si aan isaga daaweeyo.
- Waxaan qabaa shisoofrani.
- Waxaan qabaa cillada laba cirfoodka.
- Waxaan qabaa cillad niyad-jab waxaana u baahday adeegyada xasaradaha, isbitaal dhigid, ama ku daawaynta gudaha xarun 12-kii bilood ee la soo dhaafay
- Waxaan qabaa cillada isticmaalka khamriga ama maandooriyaha.
- Waxaan qabaa cudurka Alzheimer's ama asaasaqyada kale oo igu adkeeya inaan wax xusuusto iyo fahmo
- Waxaan nafaqo ka qaataa tuubbada quudinta (afka).
- Waxaan nafaqada ka qaataa kateetarka xiddidka (xiddidada).
- Waxaan qabaa xaalad kale oo caafimaad oo laga yaabo inaan ugu qalmo.

**Ma u baahantahay adeegyo ama taageerooyin kale?**
(*Calaamadee dhammaan kuwa ku khuseeya)*

- [ ] Bixiyaha daryeelka aasaasiga ah
- [ ] Daryeelka ilkaha
- [ ] Daryeelka aragga, sida ookiyaalaha ama baaritaanka indhaha
- [ ] Daryeelka maqalka, sida qalabka kaaba maqalka ama baaritaanka maqalka
- [ ] Daryeelka caafimaadka ee khaaska ah
- [ ] Daryeelka caafimaadka dhimirka
- [ ] Daryeelka cilladaha isticmaalka maandooriyaha
- [ ] Adeegyada taageerada asaaga
- [ ] Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka ee Caadiga ah
- [ ] Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- [ ] Kaalmada Kumeelgaarka ah ee Loogu Talagalay Qoysaska Saboolka ah (TANF)
- [ ] Barnaamijka Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)
- [ ] Adeegyada waxbarashada
- [ ] Adeegyada sharciyeed
- [ ] Adeegyada bulsheed
- [ ] Adeegyada kale

## Qaybta 3: Macluumaadka ururka/hay'adda

Haddii urur/hay'ad ay soo gudbinayaan foomkan loogu talagalay xubinta, buuxi macluumaadka hoose.

Magaca ururka:

_______________________________________________

Magaca iyo jagada qofka soo gudbinaya foomka:

_______________________________________________

Lambarka telefoonka: ______________________ Cinwaanka iimaylka: ______________________

Dokumeentigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhooleyaasha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala xiriir Chelsea Egbert iimaylka chelsea.egbert@oha.oregon.gov ama 503-580-0295 (cod). Waan aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka maqalka ku adag yahay.